



Helping your child  
with literacy and  
numeracy at home

Somali

# Ka caawinta ilmahaaga wax qorista akhriska iyo tiro barashada guriga

Wasaaradda Waxbarashada NSW




**Buugyarahen waxaa loo sameeyey  
waalidiinta, xannaaneeyayaasha iyo  
qoysaska carruurta ku jira sanadaha hore ee  
dugsiga.**

**Waxaa ka buuxa waxqabad lagu taageerayo  
waxbarashada muhiimka ah ee ka dhaceysa  
guriga. Waxqabadka waxaa loogu talagalay  
adigu inaad la yeelato ilmahaaga wakhti  
ciyaar leh iyo inaad caawiso inay helaan bilow  
wanaagsan oo dugsi.**

**Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu ka qaybgalo  
oo sahamiyo waxqabadka taageerna  
jawaabahooda shakhsiyeed.**

## Tusmada

<b>Qorista iyo akhriska</b>	<b>4</b>
Dhageysiga iyo hadalka	5
Akhriska	10
Qoritaanka iyo Sawiraada	16
<b>Tiro barashada</b>	<b>21</b>
Tirinta iyo Lambarada	22
Ku darta iyo ka gooda	28
Ogaanshaha iyo sameynta qaababka	32



# **Qorista iyo akhriska**

**Ka caawinta ilmahaagu  
inuu yeesho xirfadaha  
waxqorista iyo akhriska**

**Qorista iyo akhrisku waxay ku lug leeyihii  
dhageysiga, haddalka, akhriska, qorista iyo  
higaada. Waa awooda isgaarsiinta fikrada iyo  
dareenka, fikradaha iyo ra'yiyada iyo inay micno  
sameeyaan fariimaha qoraalka ah iyo kuwa  
hadalka ahiba.**



## Dhageysiga iyo hadalka

Xirfadaha dhageysiga iyo haddalka waxay dhisaan aasaaska waxbarashada ilmahaaga ee dugsiga.

Xirfadahani waxay ka caawinayaan inuu awoodo inuu la hadlo kuwa kale, uu sameysto saaxiibo oo uu si firfircoон uga qabygalo dhammaan waxqabadka dugsiga.

Haddii aad ku hadashid guriga luuqad aan ahayn Ingiriis waa muhiim inaad sii wadid inaad taageertid ilmahaagu inay isticmaalaan luuqadooda guriga.

## La hadlida ilmahaaga







- **Kala hadal ilmahaaga** wax ku saabsan mowduucyo fara badan, tusaale waxyaalaha dhaca maalin kasta.
- **La wadaag sheekoojin ka dhaqankaaga,** sheekooinkaaga iyo sheekooinka carruurtaada.
- **Sharac ama ka hadal waxyaalaha** markay dhacayaan. Tusaale, “Maanta waxaan u lugeynaynaa dugsiga waxaana sii dhaafeynaa baagga.”
- **Dhgeyso ilmahaaga kuna dhiirigeli inay markooda qaataan.** Tus sidii ay u dhageysan lahaayeen oo ay uga qaybgeli lahaayeen wada sheekeysiga.
- Markaad bilaabaysaan wada sheekeysiga ama markaad la hadleysid ilmahaaga **su'aalo weydii** u baahan jawaab ka badan haa ama maya. Tusaale, “Maxaad maanta dugsiga ku sameysay?”
- Isticmaal su'aalo **ka bilowda side ama sababtee.** Tusaale, “Intee shimbirood ayaad ku aragtaa baagga?”
- Markaad su'aalo weydiineysid **sii ilmahaaga wakhti ay ku jawaabaan.**
- **Ka dhiga wada hadalka mid wax la jeclaado ah.** Samee sheekoojin lagu qoslo, la hadal oo la hees ilmahaaga.

## Fariin u gudbinta

- **Sheeko ku soo celinta.** Ka hadal wixii dhacay markii bilowga ahayd, dhexe iyo dhammaadka sheekada.
- Ka dib markaad akhrisid, **ka hadal dadka ku jira** ama qaybta uu ilmahaagu ka jecel yahay buugga.
- **La wadaag fikrado** ku saabsan wixii dhici kara iyo markaad aadeysid munaasabad sida dabaaldeg ama dugsiga. Munaasabada ka dib, ka hadal wixii dhacay weydiina inay kula wadaagaan fikrada iyo dareenka.
- Taageer ilmahaaga si ay **ka sameeyaan sheekadooda** iyaga qiyaastooda. Weydii su'aalo sida, " Maxay sheekadu ku saabsan tahay?" "Yaa sheekada ku jira?" "Maxaa ka dhex dhacaya sheekada?"
- **Bar ilmahaaga magacooda oo buuxa**, cinwaankooda, da'dooda, dhalashadooda iyo lambarka taleefanka.
- Dugsiga ka dib weydii ilmahaaga sida maalintoodu ahayd **weydiina macluumaaad dheeraad ah**, tusaale ahaan, "Maxaad sidaa ugu fekeraysaa?"



# Buuggaagta ilmahaagaka caawinaya wadahadalkooda Ingiriiska iyo xirfada eray dhisida



## Erey dhisida

- **Isticmaal erayada sharaxaada** markaad hadleysid. Haddii ilmahaagu uu yiraahdo, "Waxaa jira eey." Ku dar sharaxaad sida, "Kaasi waa eey yar oo cad dhogorna leh."
- Dhis ilmahaaga luuqadiisa **adoo baraya erayo cusub**.
- Markaad la akhrineysid ilmahaaga **ka hadal erayada buugga lagu isticmaalay**. Ka wada hadla micnaha erayada. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad hesho erayo cusub oo xiiso leh oo aad ka hadashid.
- **Ku celceli** ku isticmaalida erayada cusub jumlad.
- **Magac u samee** alaabta kuriga taal.



# Akhriska

**Carruurtu waxay wax ku bartaan marka loo akhriyo, kuwa kale la akhrinta iyo inay iyagu isu akhriyaan.**






**Ku madadaalashada wada akhrinta maalin kasta. Raadi fursadaha sida markaad dugsiga u lugeynaysaan, dukaanka buuggaagta, maktabada iyo dukaanka weyn.**

**Ka hadal sheekooyinka, luuqada la isticmaalay, erayada sheekada ku jira, iyo sidoo kale codadka xarfaha erayada ku jira. Ku akhri buugta luuqadaada.**

# Ilmahaaga maalin walba wax la akhri




- **Ka dhig wax akhriska lagu madadaasho** oo lagu raaxeysto. Carruurtu waxay ku bartaan akhriska daawashada iyo ku dayashada iyo isdhexgalka kuwa kale.
- **U ogolow ilmahaagu inuu doorto oo uu celiyo akhriska buugta** ay xiiseynayaan.
- **Ka hadal buugta wax ku saabsan** ka hor intaadan bilaabin akhriska. Ka hadal cinwaanka iyo waxa ka dhici kara sheekada dhexdeeda.
- **Ka wada hadla sawirada** iyo siday wax ugu daraan sheekada.
- Intaad wax akhrineysid **weydii ilmahaaga su'aalo** ku saabsan sida “Maxaad u maleynaysaa inay dhacayaan oo ku xiga?” “Waa maxay sababtaad sidaa ugu maleynaysid?”
- Ka dib markaad akhrisid **ka hadal sheekada**. Weydii su'aalo sida, “Qaybtii ayaad sheekada ugu jeclayd?” ama “Maxaa farxad lahaa, qosol lahaa ama murugo lahaa sheekada dhexdeeda?”
- **Ku tookeysta akhriska** sheekooyinka aad ka heshaan ilmahaaga iyo walaahood, ama gabdhaha wallaalaha ah ama saaxiibadoo.
- **Dooro qalabka akhriska oo kala duwan** sida wargeyska, joornaalada, waraaqaha waaweyn, calaamadaha wadada, liiska cunto sameynta iyo liiska waxyaalaha la soo gadayo.

# Buugta Ingiriiska ee isku dhawaaqa leh



# Yeelashada madadaalada wax akhriska, luuqada iyo erayada

- **Dooro buugta Ingiriiska ee leh erayada isku dhawaaqa ah** ama hal xiraalayaashu ku jiraan.
- **Ka hadal erayada isku dhawaaqa ah.** Cat, hat, sat, bat dhammaan waa tusaalayaal erayo ah oo isku dhawaaq ah Ingiriis ahaan sababtoo ah dhammaadka ayey isku dhawaaq yihiiin.
- **Ku ciyaara erayada xagga dambe isku dhawaaqa ah** ciyaarana ciyaaraha Ingiriis ahaan isku dhawaaq ah. Samee jumlado isku dhawaaq ah sida, “Have you ever seen a snail deliver the mail?”









## Ku ciyaara coddadka xarfaha

- **Ku madadaasha codadka xarfaha.** Samee jumlado aan ujeedo lahayn adoo isticmaalaya erayada ka bilowda isku codka.
- Markaad ilmahaaga wax u akhrineysid, weydii inay tilmaamaan **oo yiraahdaan codadka** ay yaqaanaan.
- **La ciyaar ciyaaraha codka** ilmahaaga magaciisa. Su'aalo weydii sida, "Codkee baa magacaagu ka bilowdaa?" "Ma waxay isku cod yihiin bilowga dad?"

## Buuggagta ku saabsan xarfaha ee Ingiriiska





# Qoritaanka iyo Sawiraada

**Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu sawiro oo qoro wax ku saabsan waxyaalo xiiso leh.**

**Weydii ilmahaaga inay ka hadlaan wax sawirkooda iyo qoraalkooda ku saabsan. Xiisee sheekoo yinkooda iyo sidii ay ku doorteen inay sawiraan oo akhriyaan.**

## Qor maalin kasta

- **Ku madadaasha sawirida iyo qoraalka.** Weydii ilmahaaga inuu sawiro ama qoro wax ku saabsan waxay jecel yihiin inay sameeyaan, sameeyaan ama ciyaraan.
- **Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu ka hadlo qoraalkooda.** Tan waxaa ku jiri kara ka hadlida feegaarkooda, sawirka, xarfaha ama erayada.
- **Isticmaal qalab kala duwan** sida jeeso, qalin qori iyo warqad, calaamadeeyaal iyo qalin biire si aad wax u qorto una sawirto.
- Weydii ilmahaaga inay **qoraan magacooda**. Ilmahaagu sidoo kale wuxuu iskudeyi karaa inuu qoro magacyada dad kale ee muhiimka ku ah iyaga.
- Marka ilmahaagu uu sawirayo ama qorayo **ka hadal sawirka wax ku saabsan iyo codadka xarfaha** uu isagu ama iyadu isku deyayo inay/inuu qoro.
- **Ku dhiirigeli ilmahaaga inay isticmaalaan qiyaastooda** oo ay abuuraan sheekoojin. Waxay awoodaan inay sameeyaan buug sheeko ah iyagoo sawiraya sawiro oo erayo u qoraya sheekada.
- Taageer ilmahaaga inuu ku **qoro fariimo luuqadooda guriga**.



# Ujeedo wax u sawiraada iyo u qoritaanka

- **Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu sawiro ama qoro liiska** waxyaalaha la soo gadayo, ama wax ku saabsan qofkay ka helaan qoyska, ama buugga ay ugu jecel yihiin.
- **Samee hees ama gabay** oo qor erayada ama sawir sawiraaca heesta ama gabayga.
- **Weydii ilmahaagu inuu sharxo** waxay sawirayaan ama qorayaan markay sameynayaan.
- Ku dhiirigeli iyaga inay **u qoraan warqad** ku saabsan wax xiiso leh saaxiib ama qof qoyska ah, qosol leh ama farxad dhacday.
- **Waa inaad heysataa buug yare, joornaal ama xusuus qore** oo uu ilmahaagu maalin kasta wax ku sawiri karo ama qori karo.
- **Samee kaar** ama martiqaad dabaaldeg ama munaasabad khaas ah.

## Ka hadal fariimaha

- Weydii ilmahaaga inay **sameeyaan fariimo** ay jeelaan lahaayeen inay diraan. Waxay noqon kartaa warqad weyn sida, “Ereyga iska ilaali”, ama warqad ku socota macalimkooda oo ku saabsan waxyaalo ay jecel yihiin inay sameeyaan.
- **Isticmaal erayo maalmeedka** qaybta ka ah dhaqanka ilmahaaga, waayo aragnimada iyo waxay xiiseeyaan.
- **Ka hadal waraaqaha ama sheekooyinka** uu ilmahaagu qoray ama aad wada akhriseen.
- Markaad hadleysid, taageer ilmahaaga, inuu **ku hadlo jumlado isagoo isticmaalaya erayo kala duwan**.





# Tiro barashada

**Ka caawinta ilmahaagu  
inuu horumariyo  
xirfadooda tiro barasho**

Tiro barashado waxay ku lug leedahay inaad awoodid fahamka sida tirooyinku uga shaqeeyaan xaaladaha maalin kasta.

Waxaan aragnaa oo isticmaalnaa lambarada maalin kasta. Markaan wax akhrineyno boggu wuxuu leeyahay lambaro, gurigeenu wuxuu leeyahay lambar markaan wax iibsaneyno waxaan kala goynaa oo isku durnaa lambaro.

Caawi ilmahaagu inuu yeesho dareen wanaagsan oo ku wajahan tiro barashada.

Waa muhiim inaad ku dhisto xirfadaha tiro barashada luuqadaada guriga.



## Tirinta iyo Lambarada

Xirfada hore ee ay carruurtu yeeshaan waa wax tirinta. Tirinta waxaa ka mid ah:


- U dhihida iyo u xusuusashada lambarada sida saxda ah ee ay isugu xigaan
- Isku beegida erayada lambarka alaabta
- Iyagoo og in lambarkii ugu dambeeyey ee la tirihey uu metelo tirada wadarta shayada la tirihey.

## Erayada la isticmaalayo

- horey u tiri, dib u tirinta
- lambar ka hor, lambar ka dib
- ka badan, ka yar
- waa wax la mid ah.

## Lambarada Ingiriiska

0	zero	1	one
2	two	3	three
4	four	5	five
6	six	7	seven
8	eight	9	nine
10	ten		



## Waxqabadka lagu dhiirigelinayo waxbarashada ku saabsan lambarada

- **Isticmaal laadhuuda leh lambaro iyo dhibco** si ay uga caawiso ilmahaaga inuu garto lambarada iyo caddadka. Weydii ilmahaaga, "Intee dhibcood ayey leedahay laadhuudu?"
- **Wada ciyara cayaarta looxa** ee isticmaasha laadhuuda iyo tirinta.
- **Akhri oo wadaaga sheekoojin.** Ka hadla tirinta, caddadka, iyo lambarada aad ku aragtid buugga, oo ay ku jiraan lambarada buugga.
- **Weydii ilmahaagu inuu helo lambaro markaad lugeynaysaan.** Weydii ilmahaaga, "Lambaradee baad aragtaa?" Ka hadal lambarada guriga, lambarka baabuurka iyo calaamadaha wadada.
- **Ka hadal lambarada** ku yaal waxyalo maalmeedka sida saacada derbiga iyo taleefanada. Ka caawi ilmahaagu inuu xasuusto lambarada muhiimka ah.

## Garashada lambarada alaabta ama dhibcaha


### Qaababka dhobicda laadhuuda



### Qaababka dhobicda



### Qaababka dhobicda dumnada



## La tirinta ilmahaaga




- **Tiri markaad guriga dhexdiisa wax ka sameynaysid.** Wada kariya cunto karin fudud oo ilmahaaguna ha tiriyo waxyaalaha cuntada laga sameynayo.
- **Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu ka qayb qaato hagaajinta miiska** si qoysku ugu cunteeyo. Weydii iyaga inay tiriyaan dadka, iyo saxamada, koobabka, fargeetooinka iyo qaadooyinka looga baahan yahay miiska.
- **La tiri ilmahaaga** inta lambarka guluusyada/badhanada markaad u xireysid shaarkooda dugsiga.
- Weydii ilmahaagu inuu **tiriyo inta shey** ee ku jirta sanduuqooda cuntada.
- **Hore u tiri.** Tiri alaab maalmeedka sida baabuurta, guryaha, kabaha iyo boorsooyinka.
- **Dib u tiri.** Jaranjarada hoos uga daadegida iyo kor u fuulida. 10, 9, 8...

## Ku tirinta heesaha Ingiriis

- Here is the Beehive
- Five Little Ducks
- The Ants Go Marching
- One, Two, Buckle My Shoe
- Five Cheeky Monkeys Jumping on the Bed
- Ten Green Bottles



## Buugta ku saabsan lambarada iyo Ingiriis ku tirinta





## Ku darta iyo ka gooda


Carruurta yar ayr waxay u baahan yihiin inay yeeshaan dareen ah iskudar iyo kala goyn. Tan waxaa ka mid ah isugeynta laba shey ama wax ka badan iyo ka saarida iyo kala kaxeynta alaabta.

### Erayada la isticmaalayo

- Isku dar, isku xir, ka dhigtaa
- ka yar, ka badan
- dhammaan wadajira
- ka goo
- intee ka badan

## Waxqabadka dhiirigelinaya iskudarka

- **Iskudar cadadka alaab maalmeedka, alaabta lagu ciyaaro, miraha, buugta.** Carruurta waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan farahooda si ay wax isugu daraan.
- Markaad lugelynaysid **isku dar tirada alaab kala duwan** ee aad aragtid, tusaale ubaha jardiinka ku yaal.
- Jadwalka taariikhda, weydii ilmahaaga inuu calaamadeeyo maalmaha ay dugsiga aadeen ama ay wax kale qabteen. Toddobaadka dhammaadkiisa **iskudar inta maalmood ee waxqabad kasta uu qaatay.**
- Markaad wax gadaneyso, ka hadal waxaad u baahan tahay inaad iibsato. **Su'aalo weydii** sida, "Intee moos ayaan ugu baahan nahay qofkasta oo qoyska ah? Haddii aan soo qaato mid dheeraad ah, intee baynu heysanaynaa?"
- **Ciyaar ciyaaro dhiirigelinaa iskudarka adoo isticmaalaya laba laadhuu,** tusaale "Snakes and Ladders."








## Waxqabadka dhiirigelinaya ka gooda

- **Kala goo alaab maalmeedka.** Tiri alaabta ku jirta sanduuqooda qadada ka dibna ka goo marka alaab laga qaadaba.
- **Marka wax la cunnayo tiri inta shay** ee aad heysatid. Su'aalo weydii sida, "Intee cannab ayaad cuntay? Immisaa haray?"
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inay **ogaadaan kala duwanaanta marka alaabta laga saaro** sida ka saarida ukunta kaartoonka ama ka goynta mooska laanta.
- **Ku hees heeso** sida "Five Little Ducks".
- **Su'aalo weydii** sida, " Wuxaan ku heysanayaa baaquliga shan tufaaxa. Haddii aan cunno laba tufaax intee tufaax baa haraya?"

## Buugta ku saabsan ka goo iyo ku darta oo Ingiriis ah






## Ogaanshaha iyo sameynta qaababka

Qaab waa taxane lagu celceliyey. Waxaa laga sameyn karaa qaabab, coddad, lambaro ama alaab.

Carruurtu waxay baran karaan inay gartaan, ogaadaan, sameeyaan, guuriyaan iyo inay ku sii wadaan qaababka waxqabadka maalmeedka.





## Erayda la isticmaalayo

- ku celi
- sii wad
- abuur
- garo
- sharax
- qaab
- isku mid ah
- kala duwan

## Garo oo ogow qaababka



- **Garo qaababka** sida kuwa warqad wax lagu duubo, mutuneelaha musquasha, iyo meelaha guriga laga soo galo. Ka hadal qaababka kala duwan iyo waxa ka dhigaya qaab.
- **Ka hadal qaababka.** Weydii su' aalo sida "Maxay u tahay qaabab?" "Ma sii wadi kartaa qaabkan?"
- **Ku ciyaar kaarar ciyaar, dumnad ama laadhuu si aad uga caawisid inuu ilmahaagu garto qaababka.**

## Guurinta qaababka





- Ciyaar ciyaarta **sacabeynta** adigoo **qaab ku sameynaya sacabka** ilmahaaguna uu ku celiyo qaabka. Weydii ilmahaaga inuu u sacabeeyo qaab aad ku celiso adigu.
- **Miiska wada hagaajiya si loogu cunteeyo idinkoo isticmaalaya qaab** sida saxan iyo qaado, saxan iyo qaado, saxan iyo qaado.


## Sameynta qaababka

- **Ku samee qaabab alaab maalmeedka** sida miraha iyo alaabta lagu ciyaaro.
- **Ku bilow qaabab sahlan** ka dibna **samee qaabab ka sii adag** sida hal tufaax, laba moos, hal tufaax, laba moos, hal tufaax, laba moos.



## Buugta ku saabsan qaababka oo Ingiriis ah





## **Buugta ka caawineysa ilmahaagu inuu yeesho xirfadaha wax akhriska iyo qorista Ingiriiska**

### **Buugta ku saabsan wada hadalka iyo eray dhisida**

Dunbi the Owl – Daisy Utemorrah, editor Pamela Lofts. Scholastic Australia

Possum Magic – Mem Fox, illustrator Julie Vivas. Omnibus Books

Splosh for the Billabong – Ros Moriarty, illustrator Balarinji. Allen and Unwin

The Day the Crayons Quit – Drew Daywalt, illustrator Oliver Jeffers. Harper Collins Children's Books

The Echidna and the Shade Tree – Mona Green, editor Pamela Lofts. Scholastic Australia

The Little Refugee – Anh and Suzanne Do, illustrator Bruce Whatley. Allen & Unwin Children

The True Story of the 3 Little Pigs – Jon Scieszka, illustrator Lane Smith. Penguin

The Very Cranky Bear – Nick Bland. Scholastic Australia

## **Buuugta leh isku codka**

**Miss Spider's Tea Party** – David Kirk. Scholastic Inc

**No Way Yirrikipayi!** – Alison Lester. Pan Macmillan Australia

**Pig the Pug** – Aaron Blabey. Scholastic Australia

**Piranhas Don't Eat Bananas** – Aaron Blabey. Scholastic Australia

**Oi Cat!** – Kes Gray, Jim Field. Hachette Australia

**Sebastian Lives in a Hat** – Thelma Catterwell, illustrator Kerry Argent. Omnibus Books

**Walking Through the Jungle** – Stella Blackstone. Barefoot Books

**The Cat in the Hat** – Dr Seuss. Random House

## **Buuugta ku saabsan xarfaха**

**ABC Dreaming** – Warren Brim. Magabala Books

**Animalia** – Graeme Base. Picture Puffins


**Dr Seuss's ABC** – Dr Seuss. Random House

**I Spy, An Alphabet in Art** – Lucy Micklethwait. Greenwillow Book

Buuugta taxan waxaa loo isticmaali karaa akhris, qoris iyo tiro barashada ujeedooyin kala duwan.

**Booqo website keena ka helna macluumaad  
dheeraad ah oo ka caawiya ilmahaaga bilow  
wanaagsan oo dugsi:**

**[education.nsw.gov.au/lit-and-num-at-home](https://education.nsw.gov.au/lit-and-num-at-home)**



## Buugta Ingiriiska ee ka caawinaya ilmahaaga inuu yeesho xirfadaha tiro barashada

### Buugta ku saabsan lambarada iyo tiro barashada

**Counting on Community** – Innosanto Nagara. Seven Stories Press, Penguin.

**Counting with Tiny Cat** – Viviane Schwarz. Walker Books

**Five Little Ducks** – Penny Ives. Child's Play International Ltd

**One is a Snail, Ten is a Crab** – April Pulley Sayre and Jeff Sayre, illustrator Randy Cecil. Scholastic Australia

**One Woolly Wombat** – Kerry Argent. Scholastic Australia

**Ten Black Dots** – Donald Crews. Scholastic Australia

**Ten Little Dinosaurs** – Mike Brownlow, illustrator Simon Rickerty. Orchard Books

**Ten Little Jarjum** – Tabulam Aboriginal Community members, editors Suzi Williams and Kate Merrifield. NSW Board of Studies

**Ten Scared Fish** – Ros Moriarty, illustrator Balarinji. Allen and Unwin

## **Buugta ku saabsan kudartaa iyo ka gooyda**

**Five Little Monkeys Play Hide-and-seek** – Eileen Christelow.  
Houghton Mifflin

**Ten Little Beasties** – Rebecca and Ed Emberley. Macmillan

**Ten Little Fingers and Ten Little Toes** – Mem Fox, illustrator Helen Oxenbury. Puffin Books

**Ten Little Ladybugs** – Melanie Gerth, illustrator Laura Huliska-Beith. Intervisual Books Inc

**There Were 10 in the Bed** – illustrator Wendy Straw. Sweet Cherry Publishing

**The Shopping Basket** – John Burningham. Random House

**Uno's Garden** – Graeme Base. Penguin Books, Puffin

## **Buugta ku saabsan qaabab sameynta**

**Anno's Counting Book** – Mitsumasa Anno. Harper Collins

**Caterpillar and Butterfly** – Ambelin Kwaymullina. Fremantle Press

**One fish, two fish, red fish, blue fish** – Dr Seuss. Random House

**The Very Hungry Caterpillar** – Eric Carle. Hamish Hamilton Press

© State of New South Wales (Department of Education), 2020.

The copyright material published in this resource is subject to the Copyright Act 1968 (Cth) and is owned by the NSW Department of Education or, where indicated, by a party other than the NSW Department of Education (third-party material).

Copyright material available in this resource and owned by the NSW Department of Education is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International (CC BY 4.0) licence. This licence allows you to share and adapt the material for any purpose, even commercially.

Attribution should be given to © State of New South Wales (Department of Education), 2020.

Material in this resource not available under a Creative Commons licence:

- the NSW Department of Education logo, other logos and trademark-protected material
- material owned by a third party that has been reproduced with permission.

You will need to obtain permission from the third party to reuse its material.

## **Adeegga Turjumaanka Taleefanka**

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsigaaga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada fadlan wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada. Adeegani adiga wax lacag ah lagaama qaadi doono.